



## Daawada leh isku saameynta, kaliya waa raqiis

Markii aad ka iibsaneysid daawada dhaqtarka qoray farmashigaaga, daawada aad heshid waxay u muuqan kartaa si ka duwan oo yeelan kartaa magac aan aheyn kan dhaqtarkaaga kuugu qoray qoraalka daawada. Tani sababtoo ah farmashiga waa inuu ku siiyaa badelka ugu raqiisan ee waxa lagu qoray, markii waad keydin kartaa lacag. Daawada waxay u shaqeysaa isku midka, kaliya waa raqiis.

### Noocyo kala duwan oo isku daawada ah

Waa waxyaabaha lagu daray daawada oo loo isticmaalo daaweynta gaar ahaan cudurka ama aastaamaha qaarkood. Daawada sidoo kale waxay wadataa waxyaabaha aan firfircooneen (waxyaabaha aan war firfircooneen) si aad u midibeysid, qaabey oo dhadhami. Haddii ay jiraan noocyo ka duwan oo isku daawada, waxyaabaha lagu daray marwalba waa isku mid, laakin waxyaabaha aan firfircooneyn laga yaabo inay noqdaan.

### Kaliya sida wax ku oolka iyo kaliya sida badbaadada ah

Sababtoo ah noocyada kala duwan oo isku daawada waxay wadataa isla waxyaabaha ku jiro iyo garoojo isku mid ah, saameynada daaweynta waa isku midka iyo iyaga sidaas darteed saameynta isku aastaamaha iyo cudurka.

Dhammaan daawooyinka waa in si wanaagsan loo baaraa oo ay ansixiyaan maamulka sharciyeynta daaweynta ka hor intaan la suuq geynin. Waa inay dhammaantood buuxiyaan isku heerarka waxtarka, badbaadada iyo tayada oo aan laga eegin magaca, qiimaha, qaabka iyo baaritaanka.

Dhammaan daawooyinka waxay sababi karaan saameynada daawada. Inta badan xaaladaha, saameynada daawada waxaa sababo waxyaabaha lagu daray daawada, iyo sidaas darteed waad heli kartaa isla saameynada daawada haddii aad isticmaashid nooca qaaliga ah ama raqiiska ah isku daawada ah.

Iyada oo aan laga eegin daawada aad qaadatid, waad ka aqrin kartaa wax ku saabsan saameynada daawada ku jirto warqada baakida oo lagu bixiyo daawada. Kaliya sida magaca, qaabka iyo midibka wuu ka duwanaan karaa noocyada daawada isku midka ah, sharaxaada saameynada daaweynta sidoo kale way ka duwanaan kartaa mida ku jirto qoraalka baakida.

### Maxaa lagu siiyay daawada ugu raqiisan?

Dhammaan farmashiyada ku yaalo Denmark waxaa ku waajib ah inay ku siiyaan noocyada ugu raqiisan ee daawada kuu qoray dhaqtarkaaga.

Markii shirkada daawooyinka ay hormariyaan daawo cusub, waxaa loo yaqaan asalka, oo waxay caadi ahaan ku illaalsantahay shatiga oo muddo 10 sanno. Inta lagu jiro waqtigaan, ma jiraan shirkado kale oo loo ogolyahay inay soo saarto daawo oo isku day inaad soo saartid isku daawada ee qarashka la dhimay. Markii shatiga dhaco, shirkadaha kale waxay kadib haystaan xaquuqda lagu soo saarayo daawada sida loogu yeero daawooyinka guud ama sida fudud badeecooyinka macmiisha, tusaale ahaan, daawooyinka leh isku saameynta daaweynta oo u daaweeyo isku cudurka, sida midka orijinaalka. Markii ay jiraan dhoor nooc oo isku daawada ah – orijinaalka iyo daawada macmiilada – way tartamaan midba midka kale, iyo qiimaha daawada hoos ayuu u dhacaa.

Qaabkaan, adiga iyo bulshada waxaad badbaadisaan lacagta daawada.

### Waxaad go'aansatay haddii aad rabtid daawada ugu raqiisan

Farmashiga waxay mar walba ku siinayaan badelka ugu raqiisan ee daawadaada – illaa dhaqtarkaaga kuu qoray farmashiga saxda ah ee aad ka soo iibsaneysid waxa ku qoran qoraalka daawada. Markii

farmashiga ku siiyo badel raqiis ah ee daawadaada, marwalba waad diidi kartaa. Adiga go'aanso haddii aad rabtid nooc qaali ama raqiis ah ee daawada. Midkee ugu raqiisan oo badeli karo waqti walba oo aad aadid farmashiga si aad u soo qaadatid daawadaada. Taasi sababtoo ah waa qiimooyinka daawada way isbadelaan habeen walba.

## Tallo wanaagsan oo isticmaalayaasha daawada

- Xasuusaha waxyaabaha lagu daro oo firfircoon ee ku jiro daawadaada. Haddii aadan hubin waxa ay tahay, weydii dhaqtarkaaga ama farmashiistaha wixii tallo ah.
- Haka saarin qoraalka baakida. Waxay kuu sheegtaa waxyaabahee lagu daray ee ku jiro daawada.
- Marwalba u sheeg dhaqtarkaaga haddii aad qabtid alaarjiyo.
- Weydii farmashiga ama dhaqtarkaaga haddii aadan hubin wax ku saabsan sida loo qaato daawada.